



## **Horumarinta Xarunta Madadaalada Bulshada ee Kensington**

**(Kensington Community Recreation Centre Redevelopment)**

### **Sunta Asbestos-ka**

**Juulay 2022**

Iyada oo qayb ka ah qaabka dhismaha cusub ee Xarunta Barbiyoodka Madadaalada Bulshada Kensington (Kensington Community Aquatic and Recreation Centre), ee Degmada Melbourne waxay hawlgelisay qandaraasle aqoonsi leh inuu baaro ciida goobta sida waafaqsan Xeerka 2017 ee Ilaalinta Bay'ada, Shuruucda Amaanka iyo Caafimaadka Mihnadeed iyo Raacista Xeerarka.

Baaritaan Sheybaar ayaa muujiyey in sambala ciida ka yimid leeyihiin asbestos-ka khatarse kuma aha bulshada maadaama ay yihiin waxyaalla aan khafiif ahayn, taas oo macneheedu tahay hawada kuma sii daynayso wax asbestos ah. Taxadar kasta ayaa la sameeyey si hab amaana looga saaro ka hor intaan shaqadu la sii wadin.

Goobaha laga hellay asbestos-ka ma geli karaan dadweynuhu waxaase geli kara dad mihnadlayaal ah. Degmada Melbourne ayaa hawl gelin doonta dadka laysanka u haysta saarida asbestos-ka si loo saaro asbestoska.

### **Su'aallaha badanaa la isweydiiyo (FAQS)**

#### **Waa maxay asbestos?**

Asbestos waxaa caadatan loo isticmaali jiray in lagu warshadeeyo qalabka guryaha degaanka iyo ganacsiga laga soo bilaabo 1950naadkii ilaa 1980naadkii. Sida waafaqsan hay'ada Xafidaada Bay'ada, saddex-meelood oo meel guryaha Australia waxa ku jira asbestos. Waxaa laga heli karaa dhismayaasha, baabuurta iyo badeecadaha kale, kuwaas oo ay ku jiraan xaashiyaha shamiitada iyo tuubagelinta, aaladaha wax lagu daboollo, qaybaha korontada iyo aallada qabata bareega baabuurta.

#### **Maxay asbestos-ku u yaalliin goobta?**

Goobta waxaa laga buuxiyey qashin waxayna u badan tahay in la simay iyada oo la isticmaalayo qalab lagu sameeyey asbestos intii u dhexaysay 1951kii iyo 1962dii.

#### **Khatar ma ku jiraa haddii aan ku noolahay agagaarka ama aan horay u booqday xaruntii hore?**

Asbestos-ka laga hellay goobta kuma hayo wax khatar caafimaadka bulshada maadaama la daboolay aana la faragelin oo uu asturan yahay, taas oo macnehedu tahay inay dahaaran tahay, aana la faragelin xaalkeeduna wanaagsan yahay hadana aan lagu sii deyn. Asbestos-ku waxay khatar ku noqotaa caafimaadka haddii

asbestos-ka lagu sii daayo hawada ka dibna sanbabada laga qaato. Waxaanu samaynay la socodka hawada faybarka asbestos-ka darteed dhamaan natiijoyinkuna way ka hooseeyeen xadka ogaanshaha/dareemida.

### **Sidee saara asbestos-ka u daaweeyaan doonaan carada?**

Dadka saara asbestos-ka oo laysanka u haysta hawshaan ayaa u qodi doona asbestos-ka si waafaqsan Xeerarka Amaanka 2017 ee Caafimaadka Hawleed. Qorshaha Maaraynta Asbestos-ka ayaa la samayn doonaa waqtiga shaqada dhamaana qalabka waxaa lagu aasi doonaa dhulka ay sharciyeysay EPA si ay u aqbalaan qalabkaan.

### **Tani ma saamaynaysaa waqtiga dhamaystirka mashruuca?**

Caafimaadka bulshadeena iyo shaqaalaha ayaa noo ah mudnaanta ugu horraysa waxaana u baahanahay in aan u ogolaano waqti siyaada ah si looga saaro si amaan ah. Waxaanu diirada saaraynaa in aan dhamaystirno shaqada sida ugu dhaqsaha badan waana idin la soo xiriiraynaa markaan hello faahfaahin intaas ka badan oo ku saabsan mudada mashruuca.

### **Xaggee ka heli karaa wax intaas ka badan oo ku saabsan saarida asbestos-ka?**

Waxaad ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan asbestos-ka [www.asbestos.vic.gov.au](http://www.asbestos.vic.gov.au)<sup>1</sup> ama websaytka Fiktooriya ee EPA.

Waxaanu kaloo qabanaynaa fadhiyo lagaga jawaabayo su'aallaha ku saabsan asbestos-ka goobta.

Goorma: 4galabtii – 6maqribkii maalinta Khamiista 8da Juulay.

Xaggee: Bill Vanina Pavilion, 1A Childers Street, Kensington VIC 3031

### **Macluumaad intaas ka badan**

Booqo [melbourne.vic.gov.au/cityprojects](http://melbourne.vic.gov.au/cityprojects)<sup>2</sup>, wac 9658 9658 ama email u dir kooxda mashruuca [KCARC@melbourne.vic.gov.au](mailto:KCARC@melbourne.vic.gov.au)

### **Adeega turjubaanka**

Waxaanu u adeega dadka asal walba leh. Fadlan wac 03 9280 0726.

---

<sup>1</sup><https://www.asbestos.vic.gov.au/>

<sup>2</sup><https://www.melbourne.vic.gov.au/building-and-development/shaping-the-city/city-projects/pages/kensington-community-recreation-centre-redevelopment.aspx>